

Bulsho

(A woodaha D aahsoon
Ee Soomaaliya)

Qore: A bdikadir Dooy

E-mail: dooy11@gmail.com

2007

Hordhac

Buugaan waxuu ka sheekaynayaa xaaladaha dhallinyarada Soomaaliyeed iyo sida wadcigu u saameeyey.

Buugaan waa kii u horeeyey oo aan qoro, waxaana igu dhaliyey kadib markii aan la cajabay awoodda daahsoon ee dalka ka jirta iyo sida aan looga faa'iidayaan awoodahaas dabiiciga ah.

Waxaan ka cudurdaaranayaa wixii khalad madbici ah ama cilmi ah, waxaana caddaynayaa inaan u samayn si kutalagal ah.

Tusmada:

1. Waa maxay dhallinyaro?
2. Kaalintii dhallinyaradii hore ee Bulshada
3. Dhallinta iyo dagaallada sokeeye ee Somaliya
4. Dhallinyarada iyo qurbaha
5. Dhallinyarada Badbaaday.
6. Caqabadaha haysta dhallinyarada Somalida.
7. Dhallinta iyo mustaqbalka?

Waa maxay dhallinyaro?

Dhallinyaro waxaa lagu qeexi karaa dadka da'doodu u dhaxayso 15-35, waana xilliga ugu badan ee qofka garaadkiisa, cilmigiisa iyo dhaqankiisu isku badalaan, qofku wuxuu kasoo baxay xilligii caruurninada mana uusan gaarin xilligii ciroolanimada ama oday nimada.

Waxaan kaloo dhihi karnaa qofku markuu u dhaxeeyo da'daas wuxuu ku jiraa xilligii firfircoonida iyo hal abuurka noloshiisa mustaqbal iyo mida deegaankiisa ama dadkiisa. Qofka markuu dhallinyarada yahay ayaa la qiyaasaa dadnimadiisa iyo hawl karnimadiisaba. Cidda ugu badan ee aduunka isbadalkiisa heerarka badan ka qayb qaadata waa dhallinta, waxayse uga qayb qaataan qaabab kala duwan, sida; qaab daahsoon iyo qaab toos ah.

- **Qaabka tooska ah:**

Waa qaab aan aad u badnayn oo dhallintu uga qaybqaadatey heerarkii kala duwana ee uu soo marey isbadalka aduunka, waana in hoggaamiye/yaal dhallinyaro ah intuu soo baxo uu wax ka badalo maamul ama qaab nololeed jiray oo bulsho kuwada noolayd, waxaan qaabkaan u dambaysay baan oran karaa qarnigii 20aad, waxayna ka dhacday wadamo badan oo ku yaala qaaradaha africa iyo asia waxayna xilligaas ku jireen gumaysi dhiig miirad ah oo ku soo duulay kuwaas oo ahaa wadamadii reer europe (yurub) sida; ingiriiska, taliyaaniga iyo faransiiska.

Dallinyaradii waqtigaas kacdoonka samaysay waxaa kamid ahaa somali youth league (syl) oo 1943 ay asaaseen dhallinyaro soomaaliyeed oo u tafa xaytey sidii ay u badali lahaayeen wadcigii uu ku sugnaa wadankooda soomaaliyeed oo xilligaas ay haysteen 3 gumayste oo kala duwan

oo reer yurub ah kuwaas oo kala ah ingiriis, taliyaani iyo faransiis, kuwaas oo markii dambe dhulkii soomaaliyeed u kala qaybiyey 5 qaybood.

Halgankii syl waa tusaalaha ugu wacan ee lagu tusaaleeyo dhalinyaro soo halgantey, mirihiisina si macaan u dhadhamiyey, waxayna dhiigooda u hureen sidii ay culayska iyo cadaadiska uga faydi lahaayeen, waalidkood, walaalahood iyo dhammaan soomaali weyn-ba.

- **Qaabka daahsoon:**

Qaabkan waa mid aad u badan wuxuuna aduunka ka dhacaa xilli kasta, waana qaab dhallintu uga qayb qaadato isbadalada ayaagoon dareensanayn dhinac kasta oo ay noqotaba; dhan xukun iyo mid dhaqan ba, waxaana loo adeegsadaa sida; ciidan ahaan, ololaynta iwm.

Kaalintii dhallinyarada:

Wixii ka horeeyey burburkii soomaaliya dhallinyarada waxay bulshada soomaalida dhexdeeda ku lahaayeen kaalin aad muhiim u ah, waxayna qayb libaax ka qaadan jireen hormarka goyska, waxaana la dhihi karaa waxay ahaayeen tiirarka qoys kasta.

Dadka soomalidu waxay dhaqan ahaan ku nool yihiin miyiga, waan bulsho u bada muruq maal sida; xoola raac, beeraleey ama kaluumaysato. Dhammaan shaqooyinkan aan xusnay cidda u badan ee qaban jirtay waxay ahaayeen dhallinyaro waana sababta aan u iri dhallintu waxay ahaan jireen tiirarka qoyska soomaaliyeed.

Dhallinyarada soomaalidu waxay kaalin firfircon ka qaadan jireen, hormarinta iyo baahinta dhaqanka soomaaliyeed, waxayna ahaayeen dadka isticmaala fanka qaybibiisa kala duwan oo ay ku jiraan sarbeebaha, googaalaysiga iyo ciyaaraha dhaqanka.

Dhallinyaradii hore ee soomalidu waxay ahaayeen geesiyaal u babac dhigay awoodihii dunida u waawaynaa iyagoo xoog iyo xeelad uga xoreeyey dalka gumaystayal aad u awood badan, waxaana la oran karaa waa horseedkii xorriyada ay soomaalidu hada ku faanto.

Iyadoo la ogyahay in ay dhallinyarudu sidaas muhiim u tahay, dhallinyaro badan oo islaam ah ayaan taa ogayn.

Haddaba qofkii aan ka faa'idayso dhallinyaranimadiisa miyaysan ahayn in uu khasaaray, shaab kasta waa ku waajib in uu kafa'idaysto waqtigaas soo maraya.

Waxaa muhiim ah inuu qofka dhallinayarada ahi leeyahay meel uu ujeedo, oo micneheedu yahay inuu hadaf yeesho.

Haddii aynu eegno soomaaliya gummaysigii waxaa ka eriyey oo xornimada u keenay dhallinyaro soomaaliyeed oo da'doodu u dhaxayso 16-28 sano, waxayna dhallintani lahaayeen hadaf cad oo ahaa in ay gumaysiga iska kor qaadaan si ay u muudmuudsadaan macaanka xorriyada.

Colaadaha iyo Dhallinyarada:

Soomaalya waxaa kadhacay dagaalo balaaran oo naafeeyey umadda Soomaaliyeed oo ay ku baaba'een dhallinyaro, Caruur, Haween iyo biri magaydo aad u fara badan.

15 kii sano eee u horeeyey burburka Soomaaliya (1991-2006) waxaa dalka ku dagaalamayey qabqablaysaal badankood joogay Koonfurta Soomaaliya, xaabadii dagaaladaas lagu hurinayey waxay ahaayeen dhallinyaro, waxaan dhihi karanaa dhallinyaradu caqlixumo ayay u dhimmanayeen sababtoo ah dadka la dagaal

galinayey waxay ahaayeen dallinyaro waxaana cad dhallinyaraddaas dagaallamayey in aysan wax faa'iido ah haba yaraatee aysan heli jirin.

Haddii ay dhintaan lama aasi jirin nin ehelkiisu joogo ma ahee kii kalena shacabka ayaa isku xilqaami jirray, markii ay dhaawac noqdaana qaraabadiisa un baa la tacaali jirtay .

Haddaba maxaa keenay in ay gallaan dhallinyaradu dagaal bilaa faa,ido ah?.

Dhallinyaradan waxaa guubaabin jiray dagaal oogayaasha, waxayna u sawiri jireen khiyaali aan macquul ahayn.

Marka dagaalka lagalayo sidaan wada ognahay hogaamiye kasta wuxuu ku dhiirgaliyaa dadka uu dagaalka gallinayo 'Geesiyaal baa tihiin waad guulaysanaysaan", qabqalayaasha Somalida waxa usii dheeraa dalka idinkaa qabsan doona idinka ayaana maamulidoona. Dabadeedna yagoo

dhintay ama dhaawac ah ayaa dariiqyada looga tagi jiray.

Midda kale, dhallinyaradu waxaysan lahayn cilmi ay kushaqaystaan amaba maal ay ku ganacsaddaan si ay uga maarmaan qoriga iyo xabadda, cilmi la'aanta waxaa u keenay markii ay u burburtay dowladii dhexe ee soomaaliya mallayshiyooyinka waxay ahaayeen ciyaal aan lahayn cilmi iyo caqli midna waxayna ku caqliyaysteen xabad, bililiqo iyo dhac iyagoon soo marin waxbarsho waxayna qaateen wixii ay ku caqliyeeysteen.

Dhallinyarada Badbaaday:

Tiro badan oo dhallinyaro Soomaaliyeed ah ayaa ka badaaday dabinka dagaal oogayaasha Soomaliya, waxayna badankood ku noolyihiin Gobollada Nabdoon (Puntland iyo Somaliland), Xerooyinka qaxootiga ee wadamada Dariska ah

(Ethiopia, Yemen iyo Kenya) iyo qayb badan oo ku nool Eurube iyo America.

Dhallinyarada badbaaday ee ku sugan dalka waxay u badan yihiin Muruqmaal, Ardey, shaqaale iyo qaybta ugu badan oo ah Baaga muudo (Shaqo la'aan), waxayna u nugul yihiin inay ku biiraan kooxaha ku dagaalamaya Gobolada dalka.

Dhallinyarada Qurba joogta ah waxay u qaybsamaan labo: qayb iyagoo barbaar ah ka tagay dalka oo fahansan dhaqanka Soomaaliga iyo qayb ku barbaartay dalalka ay ku noolyihiin oo aan aqoon dhaqankii iyo afkii Soomaaliga, taasina waxay keentay inuu dhumo dhaqankii oo dhallinyaro badan loo soo celiyo dalka si loo dhaqan celiyo.

Dhallinyarada soomaaliyeed kuma eka oo kaliya maleeshiyaadkaasi, balse waxaa jira

Dhallinyara kale oo waxbarasha soo martay oo haddii aad u fiirsato aad is dhihi kartid way bahdilantahay waayo dhallinyaro aan dhaqdhaqaaqayn oo aan waxba ka hadlayn waad is dhihi kartaa.

Dhallinyarada Badbaadey ee ku sugan qaybtood waxay sameeyeen ururo ay ku mideeyan yihiin oo si tabarucaad ah u caawinaya dadka iyo deegaanka ay ku noolyihiin iyadoo laga carabaabi karo Dugsiyo waxbarasho oo dhallinyaro ay asaastay, ololayaal caafimaad oo dadka lagu barayo khataraha caafimaad ee soo wajihi kara sida Cudurka HIV/AIDS iyo u doodida xuquuqda caruurta iyo dhibanayaasha Soomaaliyeed.

Dhammaan waxqabadyadaas waxay rajo galinayaan in wali dhallinyarada Soomaaliyeed

ay ku jirto awood ay ku hormarin karaan bulshadooda, hasayeeshee waxaan wali suurta galin midaynta awooda dhallinyarada Soomaaliyeed oo ay macquul tahay in mustaqbalka dhaw la helo.

Waxaa xaqiiq ah in dhallinyaradu awoodi karaan in ay isbadalo waawayn ku sameeyaan dalka Soomaaliya oo idil haddii ay isku mabda' yihiin. Haddaba waxaa xasid mudan in si loo yareeyo awooda dhallinyarada in la sameeyey cuqdado lagu kala beeray dhallinyarada Soomaaliyeed iyadoo ay ku danaysanayaan hogaamiyayaasha ama qabqablaha Soomaalida.

Hadaba si aad u noqotid qof dhallinyaro ah oo bulshadiisu jeceshahay isku tarbiyee sifooyinkan:

1. Badi dhoola cadaynta, waji furnaanta "muusoodka ,si run iyo daacadnimo ku jirto u amaan qofkii u qalma adigoo ka madhan laba wajiilanimada,soo jiidasho iyo nifaaqba.

-
2. Ka fogow muranka iyo dood badanba waayo waa bilowga canaadka, colaada iyo kala go'ida, ula dhaqan dadka oo dhan sida aad jeceshahay in laguula dhaqmo adiga.
 3. Iska yaree canaanta una cudurdaar qofkii kugu gafa (kugu khaldama)
 4. Iska ilaali cadhada siday doonto ha ahaato'e waayo waa fal shaydaan, la soco caafimaadka iyo caqligana aad bay ugu daran tahay.
 5. Badi salaanta, waayo walaaltinimada ayay xoojisaa.
 6. Hadii aad awoodo sii hadiyad haba yaraato qiimaheedu e ehelkaaga iyo asxaabtaadaba. isbar inaad dhagaysato qofka kula hadlaya, barona habka wax loo dhagaysto inta aadanbaran habka loo hadlo.
 7. Badi saamaxaada iyo cafiga waayo waa nadaafada qalbiga iyo naftaba.
 8. Marka aad qof waaninayso ilaali dareenkiisa oo ha ku odhan ereyo dhaawacaya qalbigiisa iyo naftiisa toona.

-
9. Caawi oo garab sii qayrkaa marka ay kuu baahan yihiin, maxaa yeelay rabbi baa kuu kaalmayn doona maallinta aad baahato.
 10. Iska ilaali dhalliisha aflagaadada iyo naqdiga badan sababtoo ah kalmada xumi qalbiga ayey wax yeeshaa, waxaa laga yaabaa inay collaad iyo nacayb isu beddesho.
 11. Ha badin qosolka aan habboonayn - sababtoo ah qosolka aan macnaha lahayni haybadda iyo daggenaanta ayuu kaa qaadayaaye.
 12. Isbar dulqaadka iyo adkaysiga maxaa wacay waa laba sifo oo rabbigeen iyo rasuulkeenuba(csw) ay jecel yihiin,
 13. Ka faa'idayso waxyaalaha wanwanaagsan ee hareerahaaga ah noqona sida shinnida oo kale waayo inta ay kolba ubax fuusho ayey kala baxddaa manka iyo muudkabaa.
 14. Ka fogow balaayaysiga iyo baasaysigaba, rajadana iyo yididiiladana badi, waayo rajada oo la baddiyo waxay kuu noqonaysaa

taageero iyo xoog aad ku dhaafto waqtiyada adag.

15. Iska jir qalbi adayga iyo calool adaygaba waayo waa sifooyinka doqoniimada e.
16. Markaad fikrad soo bandhigayso qofka dareensii, inay tahay wax aad wada leedihiin oo aadan ka fariidsanaynayn kana caqli badayn.
17. Iskajir isla waynida tusna dadka inaad tahay iyagoo kale, heerka aad doontaba aad gaadhid e, waayo rabbiigeen (sw) ma eego qofka isal wayn qiyaamaha, lan soco in aadam iyo xaawo ay in wada dhaleen dhammaanteen.

Gabagabo:

Waxaa mahad iska leh Allaah, waxaan kaloo u mahad celinayaa dhammaan dadkii igu caawiyey iyo kuwa igu dhiirigaliyey qorista Buugaan la magac baxay Bulsho.

Sidoo kale, waxaan u mahad celinayaa qof kasta waqtiga uu ku bixiyey akhrinta buugaan Bulsho, waxaan jeclahay in aan mustaqbalka dhaw aan qoro buugaag kale oo kaga falanqoon doono xaaladaha dhallinyarada iyo dhammaan bulshada Soomaaliyeed.

Buugaan waxaan qoray anigoo dhigta dugsiga sare sanadka 2008, waxaana ahaa 18 jir.

Waxaan u rajaynayaa dhamaan umadda soomaaliyeed nimco, baraare iyo nabad waarta.

Qore: A bdikadir D ooy

Garowe, Somalia (2007)

E-mail: dooy11@gmail.com